

# Kaalmada Dhaqaalaha ee Swedish Financial Assistance at Swedish (Somali)

Adeegyada iyo Caafimaadka Swedish waxay daryeelan dadka iyo baahidooda caafimaad haddii ay bixin karaan iyo haddii aanay bixin karinba. Waxaanu kala shaqeeynaa bukaankeena wixii dhibaato ah, oo ay ku jiraan helitaanka habab aanu uga dhigno daryeelka caafimaadka mid la awoodo bixintiisa. Cusbitaalada Swedish waxay siiyaan caawinaad dhaqaale buknaanka u qalma ee aan awoodin bixinta biilashooda caafimaadka. Haddii aad dhibaato ku qabto bixinta dhammaan ama qaar ka mid ah daryeelka caafimaadka, fadlan kala hadal Udoodaha Dhaqaalaha Bukaanka ama Wakiilka Adeegada Macaamiisha wixii aanu kaa caawini karno adiga.

**Maxaa la bixiyaa?** Adeegyada caafimaadka ah ee muhiimka ama degdegta ah ee cusbitaalka Swedish waxaanu siina kaalmada dhaqaalaha bukaanka u qalma iyadoo ah hoos u dhiga qarashka, oo gaaraya 30 ilaa 100% oo lagu saleeynayo u qalmiitaanka bixinta. Kaalmada dhaqaale ee adeegyada aan degdegta ama aan caafimaadka muhiimka u ahayn ama adeegyada lagugu qabtay *banaanka* cusbitaalka waxay hadba ku xiran tahay awaamiirta kliniga ama afiiska ku qabtay.

**Sidee loo Codsadaa?** Bukaanku kasta ayaa soo codsan kara kaalmada dhaqaale. Bukaanka doonaya kaalmada dhaqaale waa inay keenaan macluumaadka iyo dukumeentiga laga doonayo codsiga, haddii aan si kale loo sheegin. Foomka codsiga waxaa laga dalban karaa telefoonka ama laga soo guursan karaa webside-ka hoos ku qoran. [www.swedish.org/patient-visitor-info/billing/financial-assistance](http://www.swedish.org/patient-visitor-info/billing/financial-assistance)

## **Kaalmooyinka Kale ee Caymiska**

**Caafimaadka:** Haddii aadan haysan caymiska caafimaadka, waxaa laga yaaba inaad u qalanto barnaamijyada kale ee dowlada ama bulshada. Waxaanu ka caawini karnaa sidii aad ku ogaan lahayd haddii ay barnaamijyadaas (oo ay ku jiraan Medicaid iyo Apple Health) ay kaa caawini karaan bixinta biilashaada caafimaadka. Waxaanu sidoo kale kaa caawini karnaa codsiga barnaamijyadaas.

**Ka Raqiisinta Caymis Laawayaasha:** Swedish waxay siisa ka raqiisin bukaanka aan haysan caymiska caafimaadka. Fadlan nala soo xariir haddii aad qabto su'aalo ku saabsan barnaamijkeena ka raqiisinta.

**Qorshayaasha Lacag Bixinta:** Wixii lacag bixin ah ee lagugu leeyahay waxaad ku bixin karta mid ka mid ah hababkaan: Qorshaha lacag bixinta, lacag cadaana, jeeg, bixinta biilka onlinke ama kredit kaar. Haddii aad u baahan tahay qorshaha lacag bixinta, fadlan ka soo wac lambarka biilka ku yaal wixii caawinaada.

**Daryeelka Degdegta:** Cusbitaalada Swedish ee leh qeybta degdegta waxay siiyaan daryeelka degdegta ee xaaladaha caafimaadka degdegta (sida lagu qeexay Sharciiga Shaqaalaha iyo Daaweynta Caafimaadka Degdegta) iyadoon lahayn wax takoor ah oo ku saleysan awoodooda, haddii uu bukaanku bixin karo ama aanu bixin karin ama u qalmidiisa kaalmada dhaqaalaha.

## **Nagala Soo Xariir Anaga Caawinaada Kaalmada Dhaqaalaha ama Codsiyada**

Wixii warbixin dheeraada ee ku saabsan helitaanka caawinaada biilasha caafimaadka Swedish, fadlan soo wac Kooxdeeda Adeega Macaamiisha ama soo booqo Udoodaha Dhaqaalaha Bukaanka ee cusbitaalka Swedish ee degaankaada. Waxaanu ku siin karnaa foom kasta oo aad doonayso iyo ka caawini karnaa inaad codsato caawinaad. Bukaanka waxaa si adag loogu dhiirigelinaya inay weydiistaan Kaalmada Dhaqaalaha *kahor* inta aanay bilaaban daaweynta caafimaadka, haddii ay dhammaan maquul tahay. Bukaanku waxay sido kale codsan karaan caawinaada waqti kasta inta ay daaweyntu u socoto iyo kadib markii ay helaan biilka ugu horreeya. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad doonayso foomka codsiga kaalmada dhaqaalaha, fadlan la xariir:

- Telefoonka: 877-406-0438
- Website-keena ah: [www.swedish.org/patient-visitor-info/billing](http://www.swedish.org/patient-visitor-info/billing)